

Su'aalo ku saabsan cunfiga

Cunfiga ka dhex dhaca dad ahalka ah wuxuu saameeyaa sida aad dareemeyso jir ahaan iyo maskax ahaan labadaba, waana sababta aan u weydiineyno. Wuxuu xitaa saamaynayaa caafimaadka jir- iyo maskax ahaaneed ee carruurtaada. Carruurta waxay xaq u leeyihiin inay ku koraan cunfi la'aan. Wuxuu cunfigu noqon karaa in adiga naftirkaaga lagu gaysto ama aad aragto qof kale oo loo gaysanayo. Waxaad heli kartaa taageero/caawimaad haddii lagu gaystay cunfi ama aad aragtay ama maqashay cunfi loo gaysanayo qof xigtadaada ah intii aad korinaysay. Waxaad xitaa heli kartaa taageero/caawimaad haddii aad adiga naftirkaagu qof kale u geysatay cunfi.

Xigto waxaan ula jeednaa lammaanaha, xubnaha qoyska, qaraabada hoose ama qof kale uu muhiim kuu ah.

1. Qof xigtadaada ah ma ku handadday, ku koontarooshay, ku quursatay, ku bahdishay ama kuu geysatay wax la mid ah?

- Haa
 Maya

2. Qof xagtadaada ah meel ma kugu celisay, ku kala tuurtay, wax kugu dhifatay, ku laadday ama si kale ma kuu dhaawacday?

- Haa
 Maya

3. Ma dareentay in qof xigtadaada ah uu cadaadis kugu saarayo ama kugu qasbayo waxyaabo galmo la xiriira?

- Haa
 Maya

4. Adigu ka qof weyn ahaan, si waafaqsan su'aasha 1 – 3, cid kale ma ugu gaysatay cunfi?

- Haa
 Maya

Haddii ay jiraan wax dheeri ah oo aad ku fikireysid ama aad rabto inaad ka hadasho, ku qor bogga dhankiisa dambe.

Waad ku mahadsantahay inaad ka jawaabtay su'aalaha!